

# Baaritaanka fayruska HPV

## Warbixin loogu talagalay haweenka

### Waa maxay HPV?

HPV waxay tilmaamaysaa fayruska Human Papilloma Virus.

Fayruska HPV dadka aad ayuu caadi ugu yahay. Haweenka intooda ugu badan ayuu fayrusku mar uun noloshooda ku dhacaa. Mararka ugu badan uma baahna in la daaweeyo jirka ayaana iskii isaga saari doona.

Waxaa jira noocyo farabadan ee fayruska HPV intooda ugu badanna waxyeello ma leh. Noocyada qaarkood ayaa afka ilmagaleenka cillado u keeni kara. Noocyadaas waxaa loo yaqaanaa noocyada fayruska HPV ee 'halista badan'. Haddii la iska daayo waxay cilladahaasi keeni karaa kansarka afka ilmagaleenka. Hase yeeshee, cilladaha afka ilmagaleenku badi waxay baaba'aan marka fayrusku baaba'o. Haweenka qaarkood fayrusku si fudud ugama baxo waxayna haweenkaasi halis siyaado ah ugu jiraan in ay qaadaan cilladaha afka ilmagaleenka (CIN) kuwaasoo u baahan kara in la daaweeyo.

### Sidee ayuu fayruska HPV dadka ugu dhacaa?

Fayruska HPV waxuu aad caadi ugu yahay dadka iyagu mar uun galmooday. Fayruska HPV waxaa si fudud la isugu tabiyaa waqtiga galmada ee ragga iyo haweenka dhexdooda iyo weliba lammaanyaasha isku jinsiga ah. Maadaama uusan fayrusku muujinin wax calaamado ah waxaa suurogal ah in:

Qof uu fayruska soo lahaa sanado badan isagoon ogayn.

Lammaane uu fayruska qaaday sanado badan ka hor isagoon sidoo kale ogayn.

### Waa maxay sababta la iiga baari karo fayruska HPV?

#### **Baaritaanka fayruska HPV ee haweenka qaba cilladaha unug ee loo yaqaanno dyskaryosis ee bilowga ah ama meeldhexaad ah**

Baaritaannada fayruska HPV waxaa lagu samayn doonaa samballada laga soo qaado haweenka natiijadooda baarista kansarku ay muujiso cillado meeldhexaad ah oo loo yaqaanno dyskaryosis bilow ah ama meeldhexaad ah.

Haweenka qaba dyskaryosis bilow ah ama meeldhexaad ah waxay boqolkiiba 15 ilaa 20 uun halis ugu jiraan in ay yeeshaan cillad weyn oo u baahan in la daaweeyo. Baaritaanka fayruska HPV waa muhiim maxaa yeelay waxuu ku fiican yahay in uu tilmaamo haweenka u baahan kara daawayn.

Haddii fayruska HPV la soo helo waxaa haweeneyda loogu baaqi doonaa baarista afka ilmagaleenka (colposcopy). Baarista afka ilmagaleenku waa hab si qoto dheer loogu eego afka ilmagaleenka si loo fiiriyo haddii daawayn loo baahan yahay. Haddii Daawayn loo baahan yahay waxaa haweeneyda caadi ahaan lagu arki doonaa kiliniig bukaan-socod taasoo ka dhigan in aanay u baahan doonin in ay isbitaalka habeen jiipto.

#### **Baaritaanka fayruska HPV ee haweenka daawayn laga siiyey cilladda CIN**

Baaritaannada HPV waxaa lagu samayn doonaa samballo laga soo qaaday haweenka natiijadooda baarista kansarku ay caadi tahay ka dib markii daawayn laga siiyey cilladda CIN. Haddii fayruska HPV aanan la soo helin haweenkaasi uma baahna in ay soo noqdaan si baaris dheeraad ah looga qaado ilaa saddex sano ka dib.

Haddii fayruska HPV la soo helo ama natiijada baarista kansarku aanay caadi ahayn waxaa markaa haweenkaasi loogu baaqi doonaa in ay mar kale iska soo qaadaan baarista afka ilmagaleenka waxaana loola socon doonaa sida caadiga ah.

### Sidee loo sameeyaa baaritaanka fayruska HPV?

Baaritaanka waxaa lagu sameeyaa sambalka unugyada ee la soo qaado goorta baarista kansarka markaa haweeneydu uma baahna in ay baaritaan labaad u soo noqoto. Samballada waxaa lagu baaraa shaybaar qoraal ayaana natiijoyinka haweeneyda loogu diraa.

### Halkeen warbixin dheeraad ah ka heli karaa?

Haddii aad rabto warbixin dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka fayruska HPV ama wax kaloo ku jira xaashidan xaqqiheed waxaad la hadli kartaa kalkaaliyaha caafimaadka ee xafiiska takhtarkaaga, ama booqo bogga internetka ee Barnaamijyada Baarista Kansarka ee NHS (NHS Cancer Screening Programmes) oo ah [www.cancerscreening.nhs.uk](http://www.cancerscreening.nhs.uk)